Waa halkee Xarunta Diwaangalinta Ardaygu

999 N. Jaamacada Drive (Waqooyiga Suuqa)
Fort Worth, Texas 76114
Taleefan: (817) 815-7700
Faakis: (817) 815-7705
Iimayl: spc@fwisd.org



Barnaamijka Labadda Luuqadood ee Degdega

Dr. Marie Mendoza
Agaasime Guud
marie.mendoza@fwisd.org

Xarunta Diwaangalinta Ardayga

Diana De La Paz
Agaasime
diana.delapaz@fwisd.org

Dugsiga Degmada ee Fort Worth Independent School District kuma takooro sababo la xidhiidha isirka, midabka, diinta, asalka, jinsiga, naafada, rabitaanka galmo, da'da, jinsiga, aqoonsiga iyo dhalashada, xaalada hawl-ciidan, barnaamijyadiisa iyo hawlihiisa. Shakhsiyaadkan soo socda ayaa loo xilsaaray inay waxka qabtaan su'aalaha khuseeya siyaasadaha takoorka: Patricia Sutton, 215 NE 14th Street, Fort Worth, TX 76164, Agaasimaha Adeeggyada Gaarka ah, 817.814.2458, Cynthia Allen, Mansabka IX Iskuduwaha, 7060 Camp Bowie Blvd, Fort Worth, TX 76116, 817-814-1830, Iimayl: TitleIX@fwisd.org

Fort Worth
INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT
www.fwisd.org

Rev. 2/4/25

Somali

Xarunta Diwaangalinta Ardayga

Fort Worth Independent School District

Waa maxay Xarunta Diwaangalinta Ardaygu?

Xarunta Diwaangalinta Ardayga Fort Worth ISD waxay siisaa caawimo qoysaska cusub ee aan waligood iska diwaangalin dugsi dadweyne oo Texas ah iyo ku hadla ama maqla luuqad aan ahayn Ingiriisi. Xaruntu waxay bixisaa adeeggyada diwaangalinta waxaanay qiimeyasaa ardayda si ay u qaadaan dariiqa sanad dugsiyeed guul leh.

Dhammaan ardayda cusub ee ku hadla luuqad kale oo aan Ingiriisi ahayn ma in la qiimeeyaa?

Haddii mid kamida saddexda su'aalood ee hoose lagaga jawaabo luuqad aan ahayn Ingiriisi **IYO** ardayga waligii lagama diwaangalin dugsi dadweyne oo Texas, kadib jawaabtu waa "Haa".

1. Luuqadee ayaa lagu isticmaalaa guriga?
2. Luuqadehee ayuu ku isticmaalaa ilmuhu guriga?
3. Haddii ilmuhu lahaa deegaan guri hore, luuqadehee ayaa lagu isticmaalay? Haddii aanu jirin deegaan guri hore, kaga jawaab Ma Khusays (N/A).

Muddo intee le'eg ayey shaqadani qaadanaysaa?

Wakhtigu wuu kala duwanaan doonaa 45 daqiiqo ilaa 2.5 saac, iyadooy ku xidhan tahay fasalka ardayga iyo qiimeynta. Ardayda da'da dugsiga hoose waxa la muddayn karaa wakhti danbe subaxda ama galinka danbe, madaamoo qiimeynahani aanay u dheerayn sida ardaydu da'da dugsiga sare.

Waa maxay diwaanka ay tahay inay waalidku usoo qaadaan Xarunta Diwaangalinta Ardayga?

- Cadeynta da'da iyo aqoonsiga ardayga
- Diwaanka talaalka hadda
- Foomka waalidka/masuulka ee aqoonsiga
- Cadeynta Ciwaanka
- Kaadhka warbixinta ama Qoraalka Caalamadiga (nooc kasta oo diwaan dugsi oo dugsi hore, haddii la helayo)
- Cadeynta Magan-galyo doonka/xaalada qaxoonti (dhukumentiyaha, haddii la helayo)

Waalidiintu iimayl ama faakis bay ku diri karaan dhukumentiyada la rabo.
Iimayl: spc@fwisd.org
Faakis: 817.815.7705

Miyey waalidiintu u baahan yihiin ballan?

Haa, ballamaha waxa lagu sameyn doonaa wicitaan xarunta ama xubin kooxda SPC ah ayaa lasoo xidhiidhi waalidka.

Waa maxay saacadaha shaqadu?

Xarunta waxa la furaa 8:00 a.m. ilaa 5:00 p.m. Isniin-Jimce, aanay kujirin fasaxyada dugsigu.

Maxay waalidka ka filan karaan marka wiilashooda/gabdhahooda gaynayaan xarunta?

Waalidku waxay filan karaan:

- inay salaamaan shaqaalaha ku hadla Ingiriisi, Isbaanish ama luuqado kale (turjumaano ayaa lagu helayaa codsi)
- Si aad uga heshid macluumaadka/ caawimo:
  - Diwaangalinta ardayga
  - Qiimeynta diwaangalinta hore
  - Macluumaadka barnaamijka Labo-luuqadood/ESL
  - Turjumaadaha qoraalka calaamiga
  - Macluumaadka baska
  - Macluumaadka talaalka
  - Macluumaadka Fort Worth ISD (xeerka labiska, qeybta waalidka, iwm)
  - Xog-siinta waalidka/ ardayga
  - Adeeggyada nootaayada
- Si aad ugala baxdid xarunta warqada jaalada ah ee macluumaadka diwaangalinta dugsiga loo asteeyey (wixii dhukumentiyo diwaangalin ah ee la helayo ayaa lagusoo dirayaa qeybta diwaangalinta onlaaynka)
- Lasoco adeeggyada turjumaada ee qoraalada caalamiga ah, caawimada arrimaha gadiidka, ama su'aalaha kale ee dugsiga la xidhiidha

Ma jiraa wax kharash ah oo la bixinayaa oo la xidhiidha adeeggyada ay xaruntu bixiso?

Maya, Fort Worth ISD waxay ku bixisaa adeeggyadan bilaash.